



Shirka • Mareegta Maqalka Muuqaalka ah

Waxaa kamid ah WADAAGISTA MIISKA, WADA-SHEEKAYSIGA & DUUBISTA

SHURUUDAHA DEJINTA:

- BARAWSARKA LAGU SOO TALIYEY> CHROME ama FIREFOX
- WEBCAM-KA IYO MAKARAFOONKA KU XIDHAN

Sidee ayaan ku heli karaa koonto Zoom?

Si aad u martigeliso ama ugu biirto shirkada leh in ka badan 2 qof oo soconaya muddo ka badan 40 daqiiqo, waxaad u baahan doontaa koonto Pro ah. La xiriir Adeegyada IT si aad u samaysato Koonto Pro ah. Haddii kale, waxaad iska diiwaangelin kartaa koonto bilaash ah <https://zoom.us> Guji “SIGN UP FREE (SII BILAASH AH ISKU DIIWAANGELI)”, ku qor iimaylkaaga shaqada oo guji “Sign Up (Isku Diiwaangeli) (Isdiiwaangeli)”.

Sidee ayaan u martigeliyaa kulan Zoom ah?

Guji summada Zoom ee kombiyuutarkaaga miiska ama bilaw liiska/(All Programs (Dhammaan Barnaamijyada))/Zoom. Start Zoom (Bilaw Zoom). Sign-in (Gal) Kadibna guji “New Meeting (Shir Cusub)”. Guji “Join with Computer Audio (Kula biir Maqalka Kombiyuutarka)”.


Sidee ayaan ugu casuumaa ka qaybgalayaasha?

Kadib martigelinta shirka, guji badhanka “Invite (Casuum)” ee ku yaalo xaga hoose ee daaqada kulanka (eeg sawirka TIIRKA QALABKA ZOOM ee hoose). Daaqadda xigta, guji “Default email (Asalka iimaylka)”. Tani waxay furi doontaa fariinta iimaylka Outlook. Ku dar cinwaannada iimaylka ee ka qaybgalayaasha oo u dir casuumaada iimaylka.

Sidee ayaan ugu biiraa kulan Zoom ah?

Kadib markaad hesho casuumaada iimaylka, guji xiriiriyaha “Join Zoom Meeting (Ku Biir Kulanka Zoom)”. CHROME: *Dooro fur kulanka Zoom ama soo dejiso & Soo daar Zoom, kadibna Ku Biir Kulanka.* FIREFOX: *Guji Kaydi faylka, ka dibna fur faylka Zoom.exe & Socodsii.* App-ka Zoom wuxuu ku furmaya shirka mareegta. *Dooro inaad ugu biirto muuqaal & maqal.*

TIIRKA QALABKA ZOOM



ZOOM TOOLBAR: wajiga hore ee isticmaalaha, oo ku yaalo xagga hoose ee daaqada Zoom.

“Mute (Aamusi)” iyo “Stop Video (Jooji muuqaalka)” waxay kuu ogolaanayaan inaad aamusiso oo aad joojiso bandhiga muuqaalka. Badhanka “Share (La wadaag)” waxay kuu ogolaanaysaa inaad la wadaagto kombiyuutarkaaga miiska ama sabuuradda cad. “Chat (Wada-sheekaysiga)” waxay kuu ogolaanaysaa inaad fariin dirto. “Record (Duub)” ayaa ka dhigta si aad u duubto shirka. “End Meeting (Soo afjar Shirka)” ayaa soo afjari doona kulanka.

Si aad u hesho caawimaad dheeraad ah fadlan la xiriir Adeegyada IT ee Seattle Colleges ama Xarunta eBarashada ee xerada jaamacadaada.



← SCAN to visit us
itservices.seattlecolleges.edu

ITHelp@seattlecolleges.edu